



Macaashka Kabitaanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada (SSI)

Miiska ku jira

Macaashka Kabitaanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada (SSI)	1
Waa maxay SSI?	1
Sharciyada u degsan qaadashada SSI	2
Sidee loo codsadaa SSI	3
Waxa suurogal ah in aad xaq u yeelato in lagu caawiyo	4
Waxa suurogal ah in aad xaq u yeelato in lagu siiyo Lambarka Bulshada	5
La Xiriirka Lambarka Bulshada	5

Macaashka Kabitaanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada (SSI)

Buugyarahi waxa uu kuu sharxayaa waxa uu yahay Macaashka Kabitaanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada (SSI), cidda la siiyo iyo sida loo codsado. Macluumaad gaar ah oo ku saabsan xaaladaada, waxa aad kala hawli kartaa wakiilka Lambarka Bulshada.

Maamulka Lambarka Bulshada ayaa maamulka barnaamijka, laakiin SSI lagama bixiyo cashuurta Lambarka Bulshada. Waxaa laga bixiyaa xisaabta guud ee Maaliyadda Mareykanka ee lagma bixiyo xisaabta Lambarka Bulshada.

Waa maxay SSI?

SSI waxa ay bil kasta siisaa lacag dadka dakhligoodu hooseeyo hantidooduna kooban tahay.

- Da'doodu tahay 65 ama ka weyn;
- Indho la'; ama
- Naafo ah.

Haddii aad sidoo kale qaadato Macaashka kabitaanka ah ee Lambarka Bulshada (SSI), akhri *What You Need To Know When You Get Supplemental Security Income (SSI)* (Publication No. 05-11011).

FIIRO GAAR AH: Caruurta naafada ah oo dakhliga waaalidkood kooban yahay ama aan laheyn meel kale oo wax ka soo galaan waxa

ay xaq u yeelan karaan Macaashka Kabitanka Dakhliga ee Lambarka Bulshada. Wadanka oo dhan waa isku mid lacagta la bixiyo SSIda. Hase yeeshee, gobolada qaarkood ayaa lacag ku dara. Nala soo xiriirto si aad u ogaato inta uu bixiyo gobolkaaga.

Sharciyada u degsan qaadashada SSI

Dakhliga ku soo gala iyo hantidaada

In lagu siiyo SSI waxa ay ku xiran dakhligaaga iyo hantida (aad leedahay).

Dakhliga

Dakhliga waa lacagta kaa soo gasha mushahar lagu siiyo, macaashka Lambarka Bulshada ama hawlgabka. Dakhliga waxaa kale oo ka mid ah cunta iyo hoyga. Iyada o bil kasta dakhli ku soo galo ayaad hadana qaadan kartaa SSI iyada ku xiran halka aad degan tahay. Nala soo xiriirto si aad u ogaato inta uu bixiyo gobolkaaga.

Lambarka Bulshaadu Ma xisaabo dakhligaaga oo dhan marka la eegayo SSIda. **Tusaale ahaan, ma xisaabno:**

- \$20 ee ugu horeeya dakhliga ku soo gala.
- \$65 ee ugu horeeya dakhliga shaqada kaa soo gala iyo kala bar wixii ka badan \$65.
- Macaashka Barnaamijka Kabitaanka Gargaarka Nafaqada (SNAP) oo horey loogu yiqiin gargaarka cuntada.
- Hoyga aad ka hesho hay'adaha samofalka; iyo
- Gargaarka tamarta ee guryaha la siiyo.

Haddii aad xaas tahay, waxaanu xisaabeynaa qeyb ka mid ah dakhliga xaaskaaga/saygaaga iyo hantidooda marka la eegayo SSIda. Haddii ay da'daadu ka yar tahay 18 jir waxaanu xisaabeynaa dakhliga waalidkaa iyo hantidooda. Haddii aad damiinato qof aan heysan dhalashada, waxaa suurogal in ah in aan xisaabto dakhliga iyo hantida qofka ku damiintay.

Haddii aad arday tahay, qaar ka mid ah mushaharka iyo deeqda waxbarashada lagu siiyo **lama** xisaabay.

Haddii aad tahay naafo, laakiin aad shaqeyso, Lambarka Bulshadu **marna** ma xisaabay mushaharka aad u ixticmaasho in aad ku bixiso waxyaabaha iyo adeegga kaa caawinaya in aad shaqeyso. Tusaale ahaan, haddii aad dooneyso kuraasta naafada, lacagta aad ku iibsato dakhligaaga laguma xisaabay marka la eegayo SSIda.

Sidoo kale, Lambarka Bulshadu **marna** ma xisaabo dakhliga dadka indhaha la' kaga baxa xagga shaqada. Tusaale ahaan, haddii qof indho la' uu bixiyo gaadiidka uu kaga tago soo nqodo shaqada, dakhligiisa laguma xisaabay.

Haddii aad naafo tahay ama inshaha la' dahay, qeyb ka mid ah dakhliga ku soo gala ee aad u isticmaasho (ama aad meel u dhigto) tabarka ama ku iibsato waxyaabo shaqada looga baahan yahay, **lama** xisaabay.

Hantida (aad leedahay)

Hantida aan xisaabeyno marka aan go'aan ka gaareyno SSIda waxa ka mid ah guryaha, xisaabta bangiga, lacagta caddaanka ah, warqadaha lacagta, iyo damaanaddaha.

Waxa suurogal ah in lagu siiyo SSI haddii hantidaadu qiimaheedu yahay \$2,000 ama ka yar. Waxa suurogal ah in qoyska la siiyo SSI haddii hantidaadu qiimaheedu yahay \$3,000 ama ka yar. Haddii aad leedahay hanti ma gurto ah oo aad dooneyso in aad iibiso, waxaa laga yaabaa in lagu siiyo SSI inta aad isku dayeyso in aad iibiso.

Lambarka Bulshadu ma xisaabaan wax walba oo aad leedahay marka ay go'aan ka gaarayaan SSIda. Tusaale ahaan, ma xisaabno:

- Guriga iyo dhulka aad ku nooshahay;
- Ceymiska nafta qofka ee qiimihiisu yahay \$1,500 ama ka yar;
- Gaarigaaga (inta badan);
- Dhulka qabriga ah ee aad adiga iyo qoyskaaga gadateen; iyo
- Ilaa \$1,500 oo ah lacagta aaskaaga aad ugu talo gashay iyo ilaa \$1,500 oo aad ugu talo gashay aaska xaaskaaga.

Sharciyada Kale ee aad ka soo baxayso

Si lagu siiyo SSI, waa in aad degan tahay Mareykanka ama Waqooyiga Mariana oo aa heysato dhalashada Mareykanka ama qaranka. Mararka qaarkood, dad aan heysan dhalashada ayaa xaq u yeelan kara SSI. Macluumaad dheeraad ah waxa aad ka heleysaa *Supplemental Security Income (SSI) For Noncitizens* (Publication No. 05-11051).

- Haddii aad xaq u leedahay Lambarka Bulshada ama macaash kale, waa in aad codsataa. Haddii aad xaq u leedahay, waad qaadan kartaa SSI iyo macaash kale.
- Haddii aad ku jirto goobaha qaarkood, waxa aad qaadan kartaa SSI.
- Haddii aad ku nooshahay magaalo aa guryaha lagu nasto ee baadiyaha, ama goob dadka lagu hayo sida xabsi oo kale, laguma siinayo SSI. Laakiin xaaladaha qaarkood waa laga dhaafayaa.
 - Haddii aad ku nooshahay meel dadweynaha u furan una adeegta wax ka badan 16 qof, waa lagu siinayaa SSI.
 - Haddii aad degan tahay goob aad wax ku baranayso ama tababar shaqo oo kaa caawinaya shaqada, SSI waa lagu siinayaa.
 - Haddii aad ku nooshahay hoy degdeg ah ee dadka aan hoyga laheyn, waxaa suurogal ah in SSI lagu siiyo.
 - Haddii lagu hayo goob gaar ah ama dawladdu maamusho oo wax ka badan kala bar kharashka ay bixiyaan Medicaid, waxaa suurogal ah in waxyar lagaa siiyo SSI.
 - Haddii maxkamad amarto in lagu soo xiro dambi culus oo aad geysatay darteed, ama aad duusho si aad cadaaladda iyo xarig uga baxsato, xaq uma lihid SSI.

Sidee loo codsadaa SSI

Si aad u codsato SSI, waxa aad bilaabi kartaa nidaamka oo qeyb balaaran oo ka mid ah codsiga buuxin kara marka

aad soo booqato bogayaga internetka ee www.socialsecurity.gov/applyforbenefits. Waxa aad naga soo wici kartaa **1-800-772-1213** to adiga oo weydiinaya in balan lagaaga sameeyo wakiilka Lambarka Bulshada.

Haddii aad tahay qof naafo oo doonaya inuu codsado SSI iyo Ceymiska Lambarka Bulshada ee Naafada, labadaba waxa aad ka codsan kartaa barta internetka haddii aad la soo baxdo shuruudaha hoos ku xusan:

- Da'daadu u dhaxeeyso 18 ilaa 65;
- Horey aadan u guursan;
- Aadan indhoole aheyn;
- Aad tahay qof heysta dhalashada Mareykanka oo degan mid ka mid ah 50 gobol ee Mareykanka, Degmada Columbia ama Jasiiradaha Waqooyiga Mariana; oo aad
- Horey aan u codsan SSI; ama

Si aad internetka uga codasaato Lambarka Bulshada iyo macaashka naafada ee SSI, soo booqo www.socialsecurity.gov/disability. Haddii aadan ka codsan karin barta internetka waxa aad naga soo wici kartaa Telefoonka **1-800-772-1213** si aad u smeysato balan aad kula kulnato wakiil ka tirsan Lambarka Bulshada.

Waalidiinta ama dadka mas'uulka ka ah way u codsan karaan caruurta waxa ay ilmaha indhaha la' ama naafada ee ka yar 8 sano. Xaaladaha qaarkood, qolo kale ayaa u codsan karta caruurta.

Waxyaabaha qaarkood ayaa lagaa doonayaa marka aad codsanayso. Xitaa haddii aadan heysan dhamaan waxyaabaha lagaa doonayo, codsigaaga soo gudbi. Shaqaalaha Xafiiska Lambarka Bulshada ayaa kaa caawinaya sidii aad ku heli laheyd waxyaabaha lagaa doonayo. Fadlan keen:

- Kaarka Lambarka Bulshada (ama meel lambarku ku qoran yahay);
- Shahaadaada dhalashada ama cadeyn da'daada ah;

- Macluumaad ku saabsan halka aad degan tahay; sida deynta guriga, kirada iyo magaca mulkiilaha;
- Qeybta dambe ee jeegga, buugga bankiga, ceymiska, cadeynta lacagta aaska iyo macluumaadka kale ee muujinaya dakhligaaga iyo hantida aad leedahay;
- Magacyada, cinwaanada iyo telefoonada dhakhaatiirta, isbitaalada aad tagtay, haddii aad SSIda u codsneyso in aad naafo ama indhoole tahay;
- Cadeynta dhalashada Mareykanka ama in aad xaq u leedahay dhalashada; iyo
- Buugga bangiga iyo cadeymaha bangiga, credit union, lambarada xisaabta keydka iyo deynta.

Haddii lagu ogolaado SSI waa in lacagta bankiga toos laguugu shubaa. Si toos ah ayaa lacagta bankiga laguugu shubi karaa barnaamijka Direct Express® ama wareejinta lacagta. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, soo booqo www.GoDirect.org.

Fariin ku socota naafada iyo indhoolayaasha

Sharciyo gaar ah ayaa ku caawinaya haddii aad indhoole ama naafo tahay oo aad shaqeyneyso. Waxa weli aad qaadan kartaa SSI adiga oo shaqeynaya. Marka lacagta aad ashaqeyso korortaba, waxa yaraanaya lacagta SSIda ee lagu siiyo laakiin waxa aad heysan kartaa ceymiska caafimaadka ee Medicaid.

Waxa kale oo aad lacag u keydsan kartaa si aad u gaarto hadafkaaga shaqada ama aad iskuul u aado. Marka ay sidaas tahay, lacagta aad u qoondayso ma yareyneyso lacaga SSIda ee lagu siinayo.

Dadka indhaha la'a ama naafada ah ee codsada SSI waxa ay heli karaan adeeg lacag la'aan ah oo lagu caawiyo. Adeegyadaas waxaa ka mid ah la talin, tabara shaqo iyo in laga caawiyo in ay shaqo helaan.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxa aad ka heli kartaa *Working While Disabled — How We Can Help* (Publication No. 05-10095).

Xaq aad u leedahay Racfaanka

Haddii aad nagu diidam tahay go'aank aan ka gaarno codsigaaga, waxa aad ka qaadan kartaa racfaan. Talabooyinka aad qaadeyso waxaa lagu faahfaahiyey *Your Right To Question A Decision Made On Your Supplemental Security Income (SSI) Claim* (Publication No. 05-11008).

dadka qaarkood iayaga ayaa maamusha racfaanka Lambarka Bulshada iyaga oo caawinaad lacag la'aan ah ka hela Lambarka Bulshada. Waxa aad xaq u leedahay in qof kale ku matalo. Sharciyo ayaa ka degsan cidda ku matali karta iyo inta ay qaban karaan. Waxa aanu la shaqeyneynaa cidda aad wakiilato. Na weydii haddii aad dooneyso in aad ogaato sida laguugu magacaabi karo cid ku metesha. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan wakiilka waxa aad ka heli kartaa *Your Right To Representation* (Publication No. 05-10075) or on our website at www.socialsecurity.gov/representation.

Waxa suurogal ah in aad xaq u yeelato in lagu caawiyo

Haddii lagu siiyo SSI waxaa suurogal ah in aad gargaar ka heli karto gobol ama degmada aad degan tahay. Tusaale ahaan, waxa lagu siin karaa Medicaid, cunto ama adeegga bulshada. la xiriir xafiiska adeegga dadaweynaha ee degaankaaga ama xafiiska gargaarka dadweynaha si aad u ogaato adeegga ay kuu qaban karaan.

Barnaamijka Gargaarka ee Nafaqeynta (SNAP)

IWaxaa suurogal ah in aad caawinad ka heli karto Barnaamijka Kabitaanka Gargaarka Nafaqada (SNAP), oo horey loogu yiqiin gargaarka cuntada. Haddii qof kasta oo guriga ku nool codsanayo SSI waxa aad xafiiska Adeegga Bulshada ka codsan kartaan SNAP.

Haddii aad ku nooshahay guri aanu qof kasta codsan SSI fadlan soo booqo www.fns.usda.gov/snap si aad u ogaato sida loo codsado. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan SNAP, akhri *Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP) Facts* (Publication No. 05-10101). Macluumaad dheeraad ah oo ku barnaamijka gargaarka Cuntada ee aad heli karto *Nutrition Assistance Programs* (Publication No. 05-10100).

Medicaid

Marka aad qaadato SSI, waxa aad qaadan kartaa Medicaid, oo kaa caawineysa in aad bixisa kharashka caafimaadka. Xafiiska ceydha ama gargaarka caafimaadka ayaad ka heleysaa macluumaad ku saabsan Medicaid.

In lagaa caawiyo bixinta Medicare

Haddii dakhligaagu hooseeyo hantidaaduna yar tahay, gobolka aad degan tahay ayaa laga yaabaa inuu bixiyo lacagta ceymiska, xaaladaha qaarkood, sida kharashka caafimmadka "kan aad jeebkaaga" ka bixiso, lacagta kugu beegantay iyo qeybta ceymiska ee aad iska bixisay. Gobolkaaga oo kaliya ayaa go'aan ka gaari kara. Si aad u ogaato in aad heli karo, la xiriir xafiiska gobolka iyo xafiiska ceymiska caafimaadka Medicaid. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijyadaas waxa aad ka heleysaa Xarunta Dhered ee Medicare & Adeegga Medicaid (CMS) adiga oo kala xiriir kara, **1-800-MEDICARE (1-800-633-4227)**. Haddii aad dhagaha jigto, waxa aad wici kartaa lambarka **TTY, 1-877-486-2048**.

Waxaa kale oo laga yaabaa in aad xaq u yeelato Caawinaad dheeraad ah oo lagaa bixiyo qeybta kugu soo beeganta, lacag ceymiska ee bil kasta, iyo kharashka bixinta daawada ee Medicare (Part D). Waxa suurtoagal ah in aad xaq u yeelato haddii dakhligaaga (oo ku go'an heerka faqriga ee dawladda dhexe) iyo kheyraadkaagu yar yahay. Xadka u go'an dakhligaas iyo hantida way isbedeshaa sanad kasta lama mid aha xadka u degsan SSI ee dakhliga hantida. La soo xiriir Lambarka Bulshada si aad ogaato xadka u go'an.

Waxa aad internetka ku codsan gartaa caawinaad dheeraad ah ama macluumaad dheeraad ah www.socialsecurity.gov/extrahelp. Waxa kale oo aad ka codsan kartaa ama laguugu soo diri karaa codsiga adiga oo soo waca ama tagi kartaa xafiiskeena.

Haddii aad heysato meymiska Medicaid oo bixiya daawada iyo Medicare, Medicare iyo SSI, iyo haddii uu gobolkaagu bixiyo lacag bil kasta ee Medicare, waxa aad si toos ah xaq ugu yeelanaysaa caawinaad dheeraad ah lagaamana soonayo in aad codsato.

Waxa suurogal ah in aad xaq u yeelato in lagu siiyo Lambarka Bulshada

Haddii aad shaqeyneysay oo aad bixin jirtey Lambarka Bulshada muddo kugu filan, waxaa suurogal ah in aad xaq u yeelato macaashka Lambarka Bulshada inta aad qaadaneyso SSIda. Macaashka Hawlgabka waxaa la siiyaa dadka da'doodu tahay 62 ama ka weyn iyo qoysaskooda. Macaashka naafada waxaa la siiyaa dadka naafada ah iyo qoysaskooda. Macaashka dhaxalka waxaa la siiyaa qoysaska ee qofkii shaqeynayey ka geeriyooday. Haddii aad is leedahay in aad xaq u leedahay macaashka Lambarka Bulshada, nala soo xiriir oo sameyso balan si aad ula kulanto wakiil ka socda Lambarka Bulshada.

La Xiriirka Lambarka Bulshada

Waxaa jira dhawr hab oo loola xiriiri karo Lambarka Bulshada, oo ay ka mid tahay barta internetka, telefoonka iyo in aad tagto xafiiska. Halkan waxa aan u joognaa in aan ka jawaabno su'aalahaaga oo aan kuu adeegno. In ka badan, Lambarka Bulshada waxa ay caawiyeen si ay maanta iyo mustaqbalka ugu guuleystaan iyagoo u fidiyey gargaar dhaqaale malaayiin dad ah oo halgan ugu jira nolosha.

Booqo bartayada internetka

Sida ugu haboon ee meel kasta loogala soo xiriir kaaro Lambarka Bulshada waa adiga oo soo booqda www.socialsecurity.gov. Halkaas oo aad:

- Ka sameysan *my Social Security* xisaab oo aad kala socoto *Social Security Statement (Warbixinta Lambarka Bulshada)*, ka hubiso lacagta aad shaqaysay, aad ka daabacan karto warqada xaqiijinta macaashka, ka bedeli karto lacagta bangiga laguugu shubo, aad ka daabacan karto foomka SSA-1099/1042S iyo kuwo kale;
- Ka codsan karto caawinaad dheeraad ah (Extra Help) ee ku saabsan daawada lagu qoro ee ceymiska caafimaadka ee Medicare;
- Waxa aad ka coddsan kartaa hawlgabka, naafada, iyo macaashka Medicare;
- Aad ka hesho nuqul ka mid ah daabacaadaha aan soo saarno;
- Aad ka hesho jawaabaha su'aalaha markasta la is weydiyo; iyo
- Iyo kuwo kale oo dheeraad ah!

Adeegyada qaarkood waxa aad ku heli kartaa afka Ingiriisiga oo kaliya. Soo booqo barta Luqadaha kala duwan oo aad macluumaadka ku heli karto Af Soomaali. Waxaanu idiin heli karnaa tarjubaano lacag la'aan ah oo idinka caawin kara waxyaabaha aad uga baahan tihiin Xafiisyada Lambarkaaga Bulshada Waxa aan kuu heli karnaa tarjubaan haddii aad na soo wacdaan ama aad soo booqataan Xafiiska Lambarka Bulshada.

Nagala soo xiriir

Haddii aadan heli karin internetka, waxaa jirta adeegyo dhameystiran oo aad telefoonka ku heli karto, 24ka saac, 7da cisho ee todobaadka. Nagala soo xiriir telefoonka lacag la'aanta ah ee **1-800-772-1213** ama numberka TTY, **1-800-325-0778**, haddii aad dhagaha la' dahay ama maqalku kugu adag yahay.

Haddii aad dooneyso in qof aad la hadasho, waxa aan telefoonka ka jawaabnaa inta u dhaxeysa 7da aroornimo ilaa 7da fiidnimo Isniinta ilaa Jimcaha. Waxaanu ku weydiisaneynaa in aad dulqaadato mudada aan mashquulsanahay oo telefoonadu badan yihiin ama aad mudo dheer khadka ku jirto. Waxaanu rajeyneynaa on aan kuu adeegno.



Securing today
and tomorrow